

Kubbadda koleyga & Hand the Ball

Kubbadda koleyga waa ciyaar isboorti kooxeed leh kooxo gabdho iyo wiilal ah. Kubbadda waxa aad ku baaseysaa gacmaha marka aad u baaseeyso ciyaartooyda aad isku kooxda tihiin. Ciyaarta waxaa loo ciyaaraa ayada oo kubbadda lagu ridayo goolka kooxda kale ee aad iska soo hor jeedaan. Inta ay socoto ciyaarta waxaa la sameeyaa isbadalo badan oo dhinaca ciyaartooyda ah, taas oo keenaysa in ay dhashaan goolal fara badan oo ay ciyaarta ka qayb qaataan ciyaartooy aad u faro badan. Waxa ay ka dhigaysaa ciyaar isboorti oo dhamaan ciyaartooyda kooxda loo baahan yahay si loo guulaysto. Iswiidhan waa waddan ka mid ah waddamada ugu horeeya caalamka rag iyo dumarba dhinaca kubbadda koleyga.



Hand the Ball waa nooc ka yara dabacsan kubbadda koleyga mana ahan mid diirada la saarayo tartan iyo natiijo. Ciyaartu waa ciyaar aad u furan oo maadaysi badan ayada oo la soo dhawynayo fikradaha kala duwan si wadajir loogu horumariyo isboortiga. Waxaa la isticmaalaa kubbadda jilicsan oo cagaar ah ayada oo diirada la saarayo ka qaybgalin, cillaaqaad xriir iyo dhaq-dhaqaaq jir ahaan oo farxad leh.

Maxay ka dhigan tahay ka mid noqoshada urur samafal ?

Ururada isboortiga waxaa maareeya oo maamula shaqsiyaad samafaleyaal ah, waxa ay taasi ka dhigan tahay in shaqsiyaadkaasi aanay qaadan mushaar lacageed. Iswiidhan waxaa si adag loo aaminsanyahay in ururada iskaashatada isboortigu ay yihiin muhiim. Waa sabata ay inta badan ururada isboortigu uga helaan kaalmo dhaqaale degmooyina iyo dowlada dhexe. Kaalmadaasi dhaqaale kuma filna inta badan kharashaadka ku baxa xilliyada tababarka, waxbarashada horjoogeyaasha, agabka qalab, tartamada, safarada iyo wixii la mid ah.

Xubnaha ka tirsan ururka ayaa go´ aaminaya

Ururada samafaleyaasha ah waa kuwa ku shaqeeya nidaamka dimuquraadiga ah. Ugu yaraan hal mar sannadkii ayuu ururku leeyahy kullaan sannadeed, halkaas oo ay ka tirsanyaasha bixiyay khidmada xubbinimada kaga doodayaan si wada jir ah una go´ aaminayaan waxqabadka ururka iyo sida miisaaniyada loo isticmaalayo. Kullaan sannadeedka waxa ay xubnaha oo dhami leeyihiin qof iyo cod. Codkaas oo aad ku dooran karto cidda ka mid noqonaysa xubnaha hoggaanka maamulka ururka. Kullankaas wixii ka dambeeya waxaa ururka ka masuul ah hoggaanka maamulka ururka ilaa



laga gaarayo kulan sannadeedka kaas ku xiga. Maamulka ayaa xitaa ka masuul ah in ururku raaco shuruucdiisa u degsan, shuruucdaas oo ah kuwa uu ururku ku shaqaynaayo kana dhaxeeya dhamaan xubnaha ururka.

Maxaa isboortiga lacag la iskaga qaadaa haddii dhamaan ay ku shaqeeyaan samafalnimo?

Waxaa mahadi haka gaartee u sabab ah xubnaha badan ee ku shaqaynaya mushaar la´aanta in uu yaraado kharashaadka ururka. Taasi waxa ay suura galinaysaa in tirada ugu badan ee suurtagalka ahi ay fursad u helaan isboorti, laakiin ayada oo ay taasi jirto ururku waxaa ka baxa kharashaad sida tusaal ahaan kirada garoomada, agab qalab iyo caymisyo.

Waa maxay farqiga u dhaxeeya kharashka xubbinimada iyo kharashka tababarka isboorti?

Kharashka xubbinimada waxa aad u bixinaysaa in aad xubbin ka noqotid ururka, xaq iyo saamayna ugu yeelatid ururka sida in aad maamulka ka mid noqotid una codaysid shir sannadeedka ururka. Khidmadaasi waxa ay ka dhigantahay in aad ku jirtiin caymis addiga iyo ilmahaagaba inta aad ka qayb-qaadanaysaan howlaha isbootiga. Khidmada xubbinimada waxaa la bixiyaa halmar sannadkiiba.

Khidmada tababarka waa khidmada loogu talagalay in lagu bixiyo kharashaadka kale ee ururka. Waxaa kamid ah sida soo iibinta qalabka, funaanadaha lagu ciyaaro, kirada xarunta ururka, waxbarista horjoogeyaasha iyo khidmada garsooreyaasha.

Ururka kubbadda koleyga ee Iswiidhen.

Ururada isboortiga ayaa isku duba-rida howlaha isboortiga. Ururka kubbadda koleyga ee Iswiidhen waxa doonayaa ayada oo la kaashanayo dadka ka qayb-qaateyaasha ahi in kubbadda koleyga ah ay noqoto mid ay ku dheehantahay farxad, furnaan, cadaalad, ixtiraam iyo rabitaan isku dhafnaan. Hadefta shaqada ururka kubbadda koleyga ee Iswiidhen waxaa udub dhaxaad u ah baahida ururada maxaliga ah ee isboortiga iyo mabaadiida dhaq-dhaqaaqyada isboorti ee Iswiidhen. Dhamaan ururada isboorti ee ka jira Stockholm waxa ay ka tirsanyihiin ururka kubbadda koleyga ee Stockholm.

www.handtheball.se

